

## Qaababka Lagu Doorto Canshuur Xereeye

Sharciga canshuurtu wuxuu noqon karaa mid aad u adag oo mar kasta la beddelo, taasna waxay kugu keeni kartaa baqdin iyo jahwareer – waa hadii aad canshuurtaada adigu shakhsi ahaan xereysatey. Haddii aad door-bideeyso in aad u tagto canshuur xereeye, waxaa aad muhiim u ah in aad hesho canshuur xereeye aqoon wanaagsan u leh canshuuraha si uu canshuur saxan kuugu xereeyo.



### Dooro Canshuur Xareeye:

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo xereynta canshuurtaada, xasuusnoow dhowrka qodob ee hoos ku xusan oo kaa caawin doona qaabkii aad ku dooran lahayd canshuur xereeye:

- Baar heerka aqooneed ee canshuur xareeyaha. Soo Baar:
  - Muddo intee le'eg ayuu canshuurta xareeynaayey
  - Canshuur nooc ee ah ayuu xareeyaa;
- Xafiiska canshuurta kuu xareeynaaya taariikhdiisa ka raadi Bogga Hoggaanka Ganacsiga Haboon ee loo soo gaabiyo (BBB) iyo Bogga Guddiga Xisaabiyeyaasha Gobolka Minnesota, si aad u ogaato in hadda ka hor la ganaaxey iyo in kale.
- Weydii qiimaha lacageed ee uu canshuurta ku xareeyo
- Xaqiiji in qofka canshuurta kuu xareeynaaya uu yahay qof mar walba la heli karo, gaar-ahaan hadii aad uga baahato jawaabo – ku saabsan canshuurtii lagu xareeyey.



Canshuur xareeyaha sumcadda leh wuxuu ku waydiiyaa su'aalaha ku haboon canshuurtaada, waana kan kuu soo celiya waraaqaha asalka/orjinaalka ah ee aad u dhiibtey. Hubi, in qofka canshuurta kuu xareeynaaya uu ku darey Lamabarka caddeynaaya in uu Canshuur Xereeye yahay oo uu heysto lanbarka loo yaqaan (PTIN), waa sharci in uu ku daro lanbarkaas canshuurtaada – Sharciga ayaa sidaas leh.



Xaqiiji in aad dib iskaga hubiso canshuurta lagu xereeyey – inta aadan saxiixin. Mar kale dib u fiiri si aad u hubiso iney wax walba sax yihiin. Aad bey muhiim u tahay in aad dib u eegto canshuurtaada ka hor inta aadan saxiixin.

**Xusuusnoow:** Adiga ayaa mas’uul ka ah wax-alla iyo wixii aad ku qortey canshuurtaada ama aad ku xereysatey – xattaa hadii uu qof kale kuu xereeyey canshuurta.

### Iska ilaali canshuur xereeyaha:

- Aan ku siin koobbiga canshuurta uu kuu xareeyey
- Kan kugu qal-qaaliya in uu ku siin doono waraaqo been abuur ah – oo kuu sahlaaya in ey lacag aad u badan kuu soo noqoto, lacagtaas oo aadan wax xaq u lahayn inaad sheegato
- Offer or agree to deposit your refund into their own bank account;
- Kan kugu dallaca dulsaar, oo aan rabin in uu kuu qoro qiimaha dul-saarka ama.
- Raba in aad u sii saxiixdo foomka canshuurta oo maran ama faaruq ah.

Gobolka Minnesota loogama baahna wax shahaado ama leeyasan ah – in uu heysto qofka canshuur xereeyaha ah. Lakiin, kuwo badan oo canshuurta xereeya ayaa doorta in ay qaataan shahaado ama leeyasan. Meelo badan oo canshuuraha lagu xereeyo ayaa ka tirsan hey’ado aqoontooda canshuureed ey aad u sarreyso oo u baahan tababarro, leeyasan iyo waliba shahaadooyin.

### Xafiiska u dooda xuquuqda canshuur bixiyeyaasha

Hadii aad wax su’aalo ah qabtid, fadlan la xirii Xafiiska U Doodda Xuquuqda Canshuur Bixiyeyaasha oo loo yaqaan

Waaxda Dakhliga waxaa ka go’an in ey ka dhigto qaabka canshuur xereynta mid aad u fudud – oo uu qof walbi ku qanacsan yahay.

Intii canshuur xereyntu socoto, waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay ama aad u qalanto – in canshuurtaada si bilaash ah laguugu xereeyo, waa haddii aad shuruudda dhaqaalaha, da’da iyo curyaanimada aad buuxisid.

Booq bogga Waaxda Dakhliga [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) si aad u eegto-- in aad u qalantid canshuur xereynta bilaashka ah iyo meesha kuugu dhow oo canshuur bilaash ah lagu xereeyo.

☎ 651-556-6013 or  
855-452-0767

@ [dor.tra@state.mn.us](mailto:dor.tra@state.mn.us)

✉ Xafiiska u dooda xuquuqda canshuur bixiyeyaasha  
Mail Station 7102  
St. Paul, MN 55107-7102